



# Dadka Guryaha Ka Shaqeeya

## Miiska ku jira

Ma dhamaan shaqaalaha guryaha ka shaqeeya oo dhan baa?	2
Bixinta Lambarka Bulshada iyo Canshuurta Medicare	2
Bixinta Canshuurta ee IRS	2
Warbixinta Mushaharkaas Oo Loo Soo Diro Lambarka Bulshada	2
Sidee ayaa dadka guryaha ka shaqeeya ku helayaan dhibcaha Lambarka Bulshada?	3
La Xiriirka Lambarka Bulshada	3

Haddii aad qorsheyneyso in aad shaqaaleyso qof nadiifiye ah, cuntada kariya, beeraha ka shaqeeya, ilmaha kuu haya, ama qof kale oo guriga kaaga shaqeeya oo aad siineyso ugu yaraan \$2,100 sanadka 2018? Oo ay ka mid tahay lacag caddaanka ah ee aad ku bixiso gaadiidka qofks ahqaalaha ah, cuntada ama hoyga oo la isku daray. Haddii ugu yaraan hal qof aad siineyso \$2,100, xil ayaa ku saaran.

Xilkaas oo ka sooi baxdo waxa ay xaqiijineysaa in qofka guriga kaaga shaqeeyey loo tixgeliyo canshuurta ay ku bixiyeen macashka Lambarka Bulshada iyo ceymiska caafimaadka ee Medicare. Marka aad ugu yaraan qof guriga kaaga shaqeeyey aad siiso \$2,100, waxaa waajib kugu ah:

- In aad ka jarto canshuurta Lambarka Bulshada iyo ceymiska Medicare lacagta mushaharka aad siiso;

- Canshuurta u soo dir Waaxda Adeegga Canshuuraha (Internal Revenue Service, IRS); ee
- Aad soo dirto warbixinta mushaharkaas. \$2,100 kasta oo mushahar ah, ee la siiyo shaqaalaha guryaha ka shaqeeya intooda badan waxa ay xaq u yeelanayaan rubuc macaashka Lambarka Bulshada ah iyo ceymiska caafimaadka ee Medicare. Guud ahaan, dadka intooda badan waxa ay u baahan yihiin 10 shaqo ah si ay xaq ugu yeeshaan:
  - Macaashka hawlgabka (ugu yaraan marka ay gaaraan 62);
  - Macaashka naafanida ee shaqaalaha iyo macaashka ay heleyaan dadka uu taageero;
  - Macaashka la siiyo dadka leh dhaxalka ee qoyska shaqaalaha; iyo
  - Macaashka ceymiska caafimaadka.

## Ma dhamaan shaqaalaha guryaha ka shaqeeya oo dhan baa?

Hase yeeshee, xeerar gaar ah ayaa lagu maamulaa xaaladaha soo socda:

- Haddii aad maamusho hotel, guryo dad dajiso, ama leedahay hoy loo hoydo oo aad kireyso waa in aad so sheegtaa mushaharka aad bixiso.
- Haddii dadka guryaha ka shaqeeya aanay shaqadani aheyn shaqadiisa aasaasiga ah, haka bixin (goyn) lacagta Lambarka Bulshada dadka caruurta guryaha ku haya iyo shaqaalaha da'doodu ka yar tahay 18 sano.
- Haddii aad lacag ku siiso ilmahaaga shaqo uu guriga ka qabtay kanaoo ah 21 jir ama ka weyn, lacagta aad siiso waad ka jareysaa lacagta Lambarka Bulshada.
- Haddii ad lacag ku siiso mid ka mid ah waalidiintaa ama labada shaqo ay kuu qabteen, ka jar oo bixi lacagta Lambarka Bulshada.

Wixii macluumaad dheerad ah kala xiriir Xafiiska Lambarka Bulshada

## Bixinta Lambarka Bulshada iyo Canshuurta Medicare

Xilligan la joogo, adiga iyo goobta shaqadu waxa uu mid walba bixiyaa 6.2 (2018) boqolkiba canshuurta Lambarka Bulshada ilaa \$128,400 dakhliga ku soo gala iyo 1.45 boqolkiiba canshuurta Medicare ee dhamaan dakhliga ku soo gala. Shaqaaluhu waxa ay bixiyaan 0.9 boqolkiiba weeye canshuurta Medicare shaqaalaha dakhligoodu ka badan yahay \$200,000 (\$125,000 haddii ay yihiin xaas midba gooni u xareeyo casnhurta ama \$250,000 xaas si wadajir ah u xareynaya).

## Bixinta Canshuurta ee IRS

La xiriir IRS macluumaadka ku saabsan foomamka la buuxinayo. Shaqaalaha ayaa kuu sheegaya sida foomka loo buuxiyo iyo goorta iyo halka laga diiwaan gelinayo. Waxaa kale oo

aad arki kartaa ,daabacaadda IRS Publication 926, Household Employer's Tax Guide, [www.irs.gov/publications/p926/index.html](http://www.irs.gov/publications/p926/index.html), macluumaadka foomamka aad doomeyso iyo marka aad xareyneysa.

Waxyaabaha aad dooneyso in aad ogaato:

- **Keydinta diiwaanada** — Arrin la xiriira Lambarka Bulshada, waxa aad dooneysaa magacyada, cinwaanada, iyo lagu hayo ee dadka ka shaqeeya guryaha iyo lacagta aad siisay. Nuqul ka mid ah kaarka Lambarka Bulshada ee kaarka qof kasta. Haddii mid ka mid ah shaqaalahaaga uusan heysan kaarka, waa inuu mid ka codsadaa Xafiisyada Lambarka Bulshada.
- **Diwaangelinta warbixinta** — Isticmaal canshuurta aad xareyso (Foomka IRS ee 1040) si aad ugu sheegto mushaharka ka badan \$2,100 ama ka badan ee aa siiso shaqaalaha guryaha aka shaqeeya. Qofka loo shaqeeyo, waa inuu bixiyaa qeybta Lambarka Bulshadaiyo ceymiska caafimaadka ee Medicare. sidoo kale, bixi cashuurta aad ka jarto mushaharka shaqaalaha.

## Warbixinta Mushaharkaas Oo Loo Soo Diro Lambarka Bulshada

Waxa waajib kugu ah in qofka guriga kaaga sahqeeya aad siiso nuqulada B, C iyo 2 ee foomka W-2 ee IRS (*Wage and Tax Statement*) inta ka horeysa 31ka janaayo ee xigta sanadka mushaharka la bixiyey. Nuqulka A ee foomka W-2 oo wehliyo W-3, *Transmittal of Wage and Tax Statements*, ee loo diro Lambarka Bulshada ee maalinta ugu damebysa bisha Janaayo haddii aad kombiyuutarka ku soo direyso ama waraaq ahaan sanadka xiga ee xilliga warbixinta mushaharka. Foomkan iyo sida loo buuxiyo waxa aad heli kartaa haddii aad la xiriirto xafiiska IRS. Ama haddii aad heli karto kombiyuutar waxa aad ka heli kartaa shabakadda internetka oo aad ka daabacan karto, adiga oo isticmaalaya foomka *W-2 Online*. Foomka *W-2 Online* Waa mid lacag la'aan ah oo Lambarka Bulshada loogu soo gudbiyo macluumaadka. Adiga oo

isticmaalya *W-2 Online*, waad buuxin kartaa foomka oo aad Maamulka Lambarka Bulshada ugu soo diri kartaa shabakadda internetka. Foomkan isaga ayaa kuu buuxinaya foomka W-3 (transmittal) Waxa kale oo aad u daabici kartaa shaqaalaha (haaga) ee u baahan in ay xareeyaan canshuurta.

Si aad u bilwodo, waxa aad u baahan in aad sameysato aqoonsi aad ku gasho iyo eray sir ah kaas oo kula xiriireyso xafiisyadeena kana heli karto bogga internetka ee:

**[www.socialsecurity.gov/bsowelcome.htm](http://www.socialsecurity.gov/bsowelcome.htm)**. Macluumaad dheeraad ah, oo ay ka mid yihiin sida loo buuxyo foomka oo talaabo talaabo ah waxa aad ka heleysaa: **[www.socialsecurity.gov/employer/bsohbnew.htm](http://www.socialsecurity.gov/employer/bsohbnew.htm)**.

## Sidee ayaa dadka guryaha ka shaqeeya ku helayaan dhibcaha Lambarka Bulshada?

Dadka guryaha ka shaqeeya dhibcahoda waxaa loo xisaabaa si ka duwan sida loo xisaabo dadka kale. Inta badan, qofku hal dhibic ayaa ku helayaa \$1,320 ee uu shaqeeyaba (sanadka 2018) ugu badnaan afar dhibcod sanadkii. Hase yeeshee, qofka guriga ka shaqeeya waxa uu heli karaa dhibcaha Lambarka Bulshada kaliya haddii dakhligiisu yahay ugu yaraan \$2,100 qof kasta. Tusaale ahaan, Shaqaalaha guriga ee u kala sahqeeya sadex qof waxaana ay kala siiyeen \$900, \$1,100 iyo \$2,100 sida ay u kala horeeyaa (wadar dhan \$4,100) hal dhibic oo Lambarka Bulshada ayuu ka helayaa \$2,100.

Inta dhibcod oo shaqo (oo ay ka mid yihiin kuwa guryaha ka shaqeeya) oo u baahan yahay si xaq ugu yeesho macaashka Lambarka Bulshada waxa ay ku xiran tahay da'da iyo nooca macaashka ee uu xaq u yeelanayo in la siiyo. Dadka intooda badan waxa ay u baahan yihiin in ay shaqeeyaan 10 sano (40 dhibcod) si ay xaq ugu yeeshaan macaashka. Dadka da'da yar waxa ay u baahan yihiin dhibco intaas

ka yar si ay xaq ugu yeeshaan macaashka naafanimada ama qoyskoodu ugu yeesho macaashka dhaxalka.

Xusuusnoow, haddii aadan soo sheegin mushaharka shaqaalaha kuu shaqeeya, qofkaas marna ma helayo dhibco ku fialn si uu u helo macaashka ama waxaa suurogal ah inuu helo macaash ka yar kii uu heli lahaa.

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

## Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda **[www.socialsecurity.gov](http://www.socialsecurity.gov)**. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my Social Security* xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement (Warbixinta Lambarka Bulshada)*, ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

## **Nagala soo xiriir**

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today  
and tomorrow

**Social Security Administration**  
Publication No. 05-10021-SO | January 2018  
Dadka Guryaha Ka Shaqeeya  
Household Workers (Somali)

Produced and published at U.S. taxpayer expense  
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha